

Qaaxo

Macluumaad bukaan oo ka socda dhakhaatiirta ka hortagga cudurrada faafa ee Iswiidhan.

Waa maxay sababta aan u helay macluumaadkan?

Waxaad qabtaa ama waxaa laga shakisan yahay inaad qabto cudurka qaaxada, waxaana loo baahan yahay in lagu daweeyo. Warqaddan waxay ka kooban tahay macluumaad ku saabsan qaaxada, sida cudurka loo daweeyo iyo waxa aad u baahan tahay inaad samayso.

Waa maxay qaaxadu?

Qaaxada (oo sidoo kale loo yaqaan TBC ama TB) waa cudur faafa oo ay keento bakteeriyada Mycobacterium tuberculosis. Calaamadaha cudurku badanaa waxay soo baxaan muddo dheer (bilo ama sannado) kadib markuu qofku qaado infekshanka. Badanaa qaaxadu waxay ku dhacdaa sambabbada laakiin waxay sidoo kale saameyn kartaa qaybaha kale ee jirka, tusaale ahaan qanjirrada cunaha, kiishka sambabbada, lafaha, maskaxda ama kelyaha.

Sidee ayay qaaxadu u faaftaa?

Cudurku waxaa faafiyada dadka qaba cudurka qaaxada sambabbada. Bakteeriyadu waxay ku faafi kartaa hawada goobaha gudaha ah marka uu qof cudurka qabaa qufac, qof kalena uu nuugo dhibcaha yaryar ee bakteriyada ee hawada ku jira. Qaaxadu waxay inta badan ku faaftaa dadka xiriir dhow leh oo muddo dheer wada jooga. Waa yar tahay inay dhacdo inuu qof ku qaado cudurka xiriirrada gaaban ama kulammada aan joogtada ahayn.

Sidee lagu gartaa inuu qofku qabo qaaxo?

Dhibaatooyinka uu qofku dareemo waxay ku xiran tahay meesha jirka ay kaga jirto bakteeriyada qaaxadu. Calaamadaha caadiga ah waxaa ka mid ah qufac socda in ka badan 3 toddobaad, dhidid habeenkii ah, qandho iyo miisaanka qofka oo yaraada. Dhibaatooyinka kale waxay noqon karaan barar (marka qaaxadu ku dhacdo qanjirrada cunaha) ama xanuun (marka qaaxadu ku dhacdo lafaha ama caloosha).

Sidee ayuu cudurka qaaxad u faafaa?

Dadka qaba qaaxada sambabbada, oo bakteeriyada laga heli karo xaakada ay soo tufaan, waxay noqon karaan kuwo si weyn u faafin kara cudurka ka hor inta aan daaweynta la bilaabin. Faafitaanka cudurku si dhakhso leh ayuu u yaraadaa toddobaadyada ugu horreeya ee daaweynta. Dadka qaba qaaxada ku dhacda qaybaha jirka ee ka baxsan sambabbada ma faafiyaan cudurka. Carruurta yaryar ee qaba qaaxada ku dhawaad weligood cudurka ma faafiyaan. Qaaxadu kuma faafto dharka ama alaabta iyo waxyaabaha kale. Cudurku waa dhif inuu ku faafaa marka bannaanka la joogo.

Qaaxadu ma khatar baa?

Qaaxada aan la daaweyn waxay keeni kartaa dhaawac ama dhibaatooyin caafimaad oo halis ah, mararka qaarkoodna waxay noqon kartaa mid nafta halis gelisa. Carruurta yaryar iyo dadka difaaca jirkoodu uu daciif yahay waxay si gaar ah ugu jiraan khatar weyn oo ah inay si xun ugu xanuunsadaan qaaxada.

Sidee loo daaweeyaa qaaxada?

Qaaxada waxaa lagu daaweeyaa daawooyin dila bakteeriyada keenta cudurka. Daaweyntu waxay socon kartaa dhowr bilood. Aad ayey muhiim u tahay inaad raacdo daaweynta uu dhakhtarku kuu qoray.

SMITTSKYDDSBILAD

Patientinformation från Sveriges smittskyddsläkare
Somali – Tuberkulos

Waxa kale oo muhiim ah in aanad seegin wax kaniini ah inta lagu jiro daaweynta. Haddii aadan si joogto ah u qaadan daawada, bakteriyadu waxay yeelan karaan iska-caabbain (adkaysi), cudurkuna wuxuu noqon karaa inay adkaato in la dsaweeyo.

Uma baahnid inaad lacag ka bixiso daawooyinka iyo booqashooyinka daryeelka caafimaadka.

Maxaan ka fikiraa si aanan dadka kale u qaadsiin?

Qaaxadu waa cudur halis ku ah bulshada si waafaqsan sharciyada ilaalinta cudurrada (smittskyddslagen). Sidaa darteed waa inaad raacdaa xeerarka qaarkood ee dhakhtarkaagu ku siinayaan, waxa loogu yeero xeerarka la raaco. Qof ka mas'uul ah carruur, isaga ayuu qofkaasi xil ka saaran yahay inay carruurtu raacaan xeerarka la raaco.

Waxa laga yaabaa in loo baahdo in lagugu daryeelo cisbitaalka muddo si aadan dadka kale u qaadsiin.

Xeerarka ay tahay in la raaco.

- Qofka qaba qaaxo faafaysa, looma oggola inuu tagto shaqada, dugsiga ama hawlaha wakhtiga firaaqada.
- Waa inaad dib ugu soo noqotaa booqashada dhakhtarka ee lagu dhigay haddii dhakhtarkaagu kuu sheego inaad sidaas samayso.

Muddo intee leeg ayey xeerarka la raacayo shaqaynayaan?

Xeerarkan waxaa la raacayaa ilaa dhakhtarkaagu kaaga sheego in aanad ahayn qof cudurka faafinaya.

Ma waxaad u aragtaa in xeerarka lagu sheegay inaad raacaydo ay khalad yihiin?

Waxaad codsan kartaa in dhakhtarka ka hortagga cudurada ee gobolkaaga uu dib u eego go'aanka ku saabsan xeerarka la raacayo. Markaas waxaad la xiriiraysaa dhakhtarka ka hortagga cudurada faafa ee gobolkaaga.

[Macluumaadka lagala xiriirayo dhakhtarka ka hortagga cudurrada faafa Ururka dhakhaatiirta ka hortagga cudurrada daafa \(slf.se\)](#)

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa dhakhtarka ka hortagga cudurrada faafa adiga oo wacaya xarunta dhexe ee adeegga caafimaadka ee gobolkaaga.

Inta aanay dacwadaasi dhammaystirmin, waa inaad raacdaa xeerarka lagu yiri raac.

Raad raaca caabuqa

Sida uu dhigayo sharciga ilaalinta caabuqyadu, waa khasab inaad ka qaybqaadato raad raaca caabuqa. Taas macnaheedu waxaa weeye inaad siiso macluumaad shaqaalaha daryeelka caafimaadka si ay u soo baaraan goorta, meesha iyo sida aad u qaaday iyo in laga yaabo inaad dadka kale qaadsiisay. Waxa aad sheegto waa sir oo si qarsoodi ah ayaa loo ilaalinayaa. Aad bay muhiim u tahay in la helo dadka qaba cudurka qaaxada si ay u helaan daaweyn. Qofku wuxuu qaadi karaa caabuqa cudurka laakiin khasab ma aha inuu u jirado cudurka.

Macluumaad dheeraad ah

[Qaaxo – tbc | 1177 \(1177.se\)](#)

